



labadaba waa lacadaabayaa, wax wayna lagu cadaabimaayo, mid kaadida iskama duwi jirin, kan kalena dadka ayuu warka u kala qaadi jiray

Ibnu Cabaas-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-ayaa soo maray laba qabri, wuxuuna yiri: "labadaba waa lacadaabayaa, wax wayna lagu cadaabimaayo, mid kaadida iskama duwi jirin, kan kalena dadka ayuu warka u kala qaadi jiray" wuxuuna soo qaatay laan timireed qoyan wuuna u kala dilaaciyey labo qaybood, qabri walbana qaybuu ku talaalay, waxay dheheen-asaxaabtii-: Rasuulka Ilaahayow maxaad sidaa u samaysaa? wuxuu yiri: "waxaa laga yaaba inay ka khafifiyaan intaysan qalalin.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ayaa soo maray laba qabri wuxuuna yiri: Labada qof ee qabriyadan ku jira waa la cadaabayaa, wax wayna lagu cadaabimaayo aragtidiina, wax wayn bayna ka tahay xaga Ilaahay. Midkood wuxuu ahaa midaan danaynayn inuu ka ilaaliyo jirkiisa iyo dharkiisa kaadida markuu xaajo gudanaayo. kan kalena dadka ayuu warka u kala qaadi jiray, isagoo ay ka tahay iska horkeenid, dhibaataayn iyo inay isku dhacaan dadku.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3010>

